

# Miyaad ka welwelsan tahay astaamo kansarka ilma-galeenka?

Somali version

Caloosha oo dhibirsan?

Dheregsanaan had iyo jer ah?

Calool xanuun?

U bahaan in aad kaadis sidii hore ka badaan?



## Maxay yihiiin astaamaha kansarka ilma-galeenka?

- Caloosha oo dibiro joogto ah leh
- Markiiba dhergid iyo ama cunto quudsiga oo yaraada
- Lafaha miskaha iyo gumaarka oo xanuuna
- Astaamo kaadi mareenka ah (kaadi degdeg kuu qabata ama kaadida oo sidii caadiga ahayd ka badata)

Marmarka qaarkood waxaa jiri kara astaamo kale:

- Isbedel ku yimaada dabeeccadda calool socodka (tusaale, shuban ama dhibir)
- Daal aad iyo aad u badan (in daal aad ah la dareemo)
- Caatoobid aan la sharixi karin sababteeda

Wixii dhiig ah ee caadada ka dib ah waxaa had iyo goor haboon in uu baadhitaan ku sameeyo Dhakhtar Cudurada Guud (GP).

Astaamaha kansarka ilma-galeenku waa:

- **Soo noqnoqda** – caadiyan waxay dhacaan in ka badan 12 jer bishiiba
- **aan suulin** – ma tagaan
- **cusub** – caadi kuuma aha in badan oo ka mid ahina waxay bilaabmeen sannadkii tegay gudahiisa

## Miyaad ka welwelsan tahay astaamahaaga?

Haddii aad si joogto ah u dareento mid ama wax ka badan oo astaamahaaga ah, oo aan caadi kuu ahayn, waa muhiim inaad aragto dhakhtarkaaga. Uma badna in astaamahaaga ay keentay dhibaato khatar ah laakiin waa muhiim in baadhitaan lagu sameeyo.

**U diyaar garow ballanta GP-gaaga**

- La soco astaamahaaga adigoo isticmaalaya Qoraal maalmeedlaha Astaamaha ee kansarka ilma-galeenka (waxaa lagu heli karaa daabacaad ahaan ama dalab ahaan):  
[targetovariancancer.org.uk/symptomsdiary](http://targetovariancancer.org.uk/symptomsdiary)

- Wax ka badan ka ogow taariikhda qoyskaaga. U sheeg GP-gaaga haddii labo ama wax ka badan oo qoyskaaga ah ay lahaayeen/leeyihin kansarka ilma-galeenka ama naasaha

### **Baadhitano nooce ah ayaa laga yaabaa in GP-gaagu sameeyo?**

- Haddii astaamahaagu yihiin kuwo soo noqnoqonaya oo aan suulayn GP-gaaga waxaa haboon inuu kuu diro baadhitaan dhiig oo CA125
- Waxaa sidoo kale laga yaabaa inuu kuu diro sawir ultrasound ah oo caloosha iyo ilma-galeenka ah

### **Maxaa xiga?**

- GP-gaaga weydii wax ay talaabooyinka xiggaa noqonayaan
- Noqo mid ku adkaysta! Ku noqo GP-ga ama raadso ra'yi labaad mudo labo isbuuc gudahood ah haddii aan astaamahaagu baabi'in

## **Xagee ayaad warbixin intaa ka badan ka heli kartaa?**

### **Target Ovarian Cancer**

-  **2 Angel Gate, London EC1V 2PT**
-  **020 7923 5475**
-  **info@targetovariancancer.org.uk**
-  **targetovariancancer.org.uk**
-  **facebook.com/TargetOvarianCancer**
-  **@TargetOvarian**

*Worbixintan waxaa ansixiyey qorshaha Heerka Warbixinta si loo hubiyo in ay bixinayso warbixin sugar oo tayadeedu sarayso.*



*Dib u eegidii ugu dambaysey: Juun 2017*

*Dib u eegidda xigta: Meey 2020*

©Target Ovarian Cancer 2017

Target Ovarian Cancer waa shirkad ku cayiman heshiis damaanadeed, oo ka diiwaan gashan Ingiriiska iyo Weelishka (No. 6619981). Xafiiska ay ka diiwaan gashan tahay: 2 Angel Gate, London EC1V 2PT. Lambarka diiwaanka samafal 1125038 (Ingiriiska iyo Weelishka) iyo SC042920 (Iskoodlaan).